A Guide to Survivors of Domestic Violence

A Domestic Violcence Handbook#
Written & Published by

Womens Rights Foundation

Jadwalka Tusmada

Introduction 7

UNDERSTANDING DOMESTIC VIOLENCE 10

1. **What is Domestic Violence? 10**
2. **Who can be a victim of Domestic Violence? 11**
3. **What steps can I take if I am a victim of Domestic Violence? 12**
4. **Am I being stalked? 13**
5. **If I leave the matrimonial home will I lose any rights? 14**
6. **Should I report my aggressor to the police? 14**
7. **What can I expect after I file a report with the police? 15**
8. **Can I withdraw the report made to the police? 16**
9. **Following my report, can the police provide me with protective measures? 16**

CRIMINAL COURT AND CIVIL COURT 17

1. **Can I be issued with a protection order? 17**
2. **What does the protection order contain and how long is it valid for? 18**

GOING TO THE CRIMINAL COURT 20

1. **What are my rights during court proceedings? 21**
2. **What can I do to help prove my case in court? 22**
3. **Do I have to testify against him? 23**
4. **Will my children have to testify? 23**

GOING TO THE FAMILY COURT 25

1. **Do I have to go through mediation proceedings if I am a survivor of domestic violence? 25**
2. **Can I ask the court to order my aggressor to vacate the home that we share together? 25**
3. **Can the court award me with full care and custody of my children? 26**

4. Can I ask for maintenance both for myself and the children? 26

5. Will the abusive parent of my children have access to them? 26

COMPENSATION FOR PEOPLE WHO HAVE BEEN SUBJECTED TO DOMESTIC VIOLENCE..... 27

Hay'ada Xuquuqda Haweenka waxaa ka go'an inay bixiyo macluumaad, waxbarasho iyo awood-siinta haweenka ee ku saabsan xuquuqdooda sharciga ah. Wuxuu sidaas sameeyaa isagoo: -

- Siinaya haweenka talo sharciyeed lacag la'aan ah, qarsoodi ah oo ay bixiyaan qareenno uqalma
- Awood-siinaya haweenka si ay u fahmaan ugana faa'iideystaan xuquuqdooda sharciyeed iyadoo loo marayo kullanada macluumaadka iyo tababarka
- Ujeeddadu waa in la hubiyo in xuquuqda haweenka la ilaaliyo iyadoo loo marayo dib-u-habeyn siyaasadeed iyo sharciyeed, kor loo qaado wacyiga iyo in tababar la siiyo shakhsiyaadka iyo ururada.

Hay'ada Xuquuqda Haweenka, 203, Dhismaha Vincenti Building, Waddada Old Bakery Street Valletta, VLT 1445
Iimayl: -info@wrf.org.mt
Mareegta: -www.wrf.org.mt

Afeef: Haguhu wuxuu bixiyaa guudmarka guud ee xuquuqda, sharciyada, hanaanka iyo habraacyada kadib marka la soo gudbiyo warbixin ku saabsan rabshadaha qoyska gudaha Malta. Hagahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya mana ahan talo sharciyeed. Macluumaadka ku jira hagahan wuxuu saxan yahay ilaa Juun 2018. Hay'ada Xuquuqda Haweenka ma aqbali karto mas'uuliyadda ka dhalata wixii ku tiirsanaanta macluumaadka sharciga ah ee lagu soo bandhigay hagahan.

Dhammaan xuquuqaha daabacaad way dhawran yihiin. Qayb kamid ah daabacaadan dib lama soo saari karo, laguma keydin karo nidaam dib looga heli karo ama looma gudbin karo qaab kasta ama si kastaba ha noqotee, iyadoo oggolaansho hore laga haysan Hay'ada Xuquuqda Haweenka.

MAHADCELIN

Buug-gacmeedkan waxaa maalgeliyey Small Initiative Support Scheme, Lambarka Heshiiska 37/2017.

Mahadcelin gaar ah oo ku socota Dit. Lara Dimitrijevic, Dit. Stephanie Caruana, Dit. Rebecca Muscat, Dit. Kirk Brincau, Dit. Ruth Ellul iyo Dit. Penelope Vassallo oo qoreen buug-gacmeedka, ku socota Rose Sciberras oo u turjumtay luqadda Maltaanka iyo Proteus Marketing & IT Solutions Ltd. hawshooda qaabeynta jaldiga.

Hay'ada Xuquuqda Haweenka ayaa u mahadcelinaysa dhammaan dadkii taageeray oo gacan ka gaysatay daabacaadan oo ay ka mid yihiin Victim Support Unit (Ciidanka Booliska Malta), Agenzija Appogg, Dar Merhba Bik, SOAR iyo Guddiga loogu talagalay Waaxda Iskaa-wax-u-qabso ee noo xilsaaray mashruucan.

Hordhac

Buug-gacmeedkan wuxuu siiyaa macluumaad iyo taageero dadka la kulmay rabshadaha qoyska. Wuxuu sharraxayaa waxyaabaha udub-dhexaadka u ah rabshada qoyska waana hage qofka isku caawiyo oo sharraxaya xuquuqdaada sharciyeed iyo sida looga helo caawimaad nidaamka sharciyeed. Hagahan ayaa sidoo kale sharraxaya heerarka kala duwan ee hanaanka sharciyeed, laga soo bilaabo goorta go'aan lagu gaaro in loo gudbiyo dhacdada booliiska, iyadoo loo marayo hanaanka maxkamadda ilaa xukunka ugu dambeeya iyo dacwadaha madaniga ah.

Buug-gacmeedka Rabshada Qoyska waxaa loo qaybiyay qaybaha soo socda:

1. Fahamka waxa ay yihiin waxyaabaha udub-dhexaadka u ah rabshadaha qoyska iyo waliba ficil kasta oo la qaadi karo haddii aad u maleysid inaad tahay dhibbane rabshaded.

2. Doorarka kala duwan ee Maxkamadda Dembiyada iyo Maxkamada Qoyska. Qeybtani waxay sidoo kale sahmineysaa qaababka kala duwan ee tallaaboyin ilaalin loo qaadi karo.

3. Magdhowga qaancelinta dhibbaneyaasha rabshada qoyska.

Rabshada qoyska si aan toos ahayn ayay u saameeysaa dumarka marka lala barbardhigo ragga, iyadoo loo eegayn da'dooda, jinsigooda, jinsiyadooda, qowmiyadooda iyo naafanimadooda. Sida laga soo xigtay warbixinta FRA (2014) 1 kamid ah 4 dumarba ayaa dhibbane rabshadeed ah isla markaana gabdhaha ilaa da'da 15 ayaa soo sheegeen in ay la kulmeen nooc ka mid ah faraxumeynta.

Sidaas awgeed, gudaha buug-yarahan, waxaan ugu yeeraynaa dembiilaha rabshada qoyska 'isaga; qofka la

kulmayna rabshada qoyska 'iyada'. Si kastaba ha noqotee, macluumaadka ku jira buug-gacmeedkani wuxuu si la mid ah u quseeyaa ragga ka badbaaday rabshada qoyska. Dhibbane kasta oo rabshada qoyska wuxuu xaq u leeyahay caawimaad xaga sharciga ah.

Iyadoo ku xiran heerka uu marayso dacwada waxaan u adeegsanaa ereyga 'eedeeysane' si aan u qeexno dambiilaha iyo 'dacwad-oogaha', 'dhibbanaha' ama 'badbaadaha' si aan u sharraxno ka badbaadaha rabshada qoyska.

Rabshadda qoyska waxaa geysan kara qof aad xiriir la leedahay ama la lahaan jirtay. Waxay noqon kartaa xadgudub jireed ama galmo ah ama xadgudub shucuureed. Waxaa geysan kara xubin ka mid ah qoyskaaga, ha ahaato mid loo geysto carruurta iyo dadka waaweynba.

Ma jiro qof xaq u leh inuu baqdin galiyo, u hanjabo, dhaawaco, caayo ama xukumo qof kale. Waa sharcidarro. Sharciga iyo nidaamka sharciga ayaa u jooga inay ku difaacaan. Waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo macluumaad ku saabsan adeegyada la heli karo, lagugu siiyo waxyaabaha ku soo kordha warbixintaada luqad aad fahanto iyo sidoo kale waxyaabaha ku soo kordha tallaabo kasta oo fal dambiyeed ah oo la qaado.

Nidaamka sharciga wuxuu noqon karaa mid lagu jahwareero oo ku cabsi geliyo wuxuuna xitaa kaa niyad jabin karaa raadinta caawimaada aad u baahan tahay. Aadista maxkamadda waxaa ku bixi kara waqti, hawl iyo samir.

Buug-gacmeedkani waxaa loogu talagalay inuu ku siiyo macluumaadka ku saabsan nidaamka sharciga iyo sharraxaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada sharciyeed.

FAHAMKA RABSHADA QOYSKA

1. **<u>Waa maxay Rabshada Qoyska?</u>**

   Rabshada Qoyska waxay noqon kartaa qaabab fara badan, oo ay ku jiraan xadgudub jireed, maskaxeed, galmo iyo xadgudub dhaqaale. Intaa waxaa sii dheer, waxaa la geysan karaa iyadoo la adeegsanayo ficil iyo ficil la'anta labadaba. Xadgudubka wuxuu ka koobnaan karaa garaacid, gubid, xadgudub galmo, aflagaado, hanjabaad, eedeymo aan sal lahayn iyo raad laheyn oo sinaysasho, go'doon bulsheed, dabagal iyo xakamayn maaliyadeed, haddii aan xuso dhawr tusaale. Xadgudubka noocan ah wuxuu noqon karaa mid joogto ah, ama wuxuu ka dhici goob go'doon ah.

   Sharciga Rabshadda Ku Saleysan Jinsiga iyo Sharciga Rabshada Qoyska wuxuu ku qeexayaa Rabshada Qoyska inay tahay:
   'dhammaan ficillada ama ficil la'aanta oo ay ku jiraan aflagaadada, rabshada jireed, maskaxeed, galmo ama rabshada dhaqaale oo keena waxyeellada shucuureed ama silica, oo ay ku jiraan halisyada ficilada ama ficil la'aanta, qasabka, ama xorriyad ka qaadida noocaas ah, oo ka dhex dhacda qoyska ama guriga qoyska, haddii dambiiluhu la deggan yahay ama la degganaa guriga iyo haddi kale, waxaana ku jiri kara carruurta marqaatiga ka ah rabshadaha ka dhex dhaca qoyska ama guriga qoyska'

   Waxyaabaha soo socdaa waa liiska hubinta ee kaa caawin kara inaad go'aansato haddii adiga ama qof aad taqaanid lagu xadgudbay.

   Lamaanahaagu miyuu:

- Si joogto ah ma u dhaleecayaa adiga iyo awoodahaaga?
- U dhaqmaa mid aad kuu ilaaliyo ama si xad-dhaaf ah ma u maseyraa?

- Ma kuugu hanjabaa inuu waxyeelo u geysan doono adiga, carruurtaada, rabbaayada, xubnaha qoyska, asxaabta ama isku geysan doono?
- Ma kaa hor istaagaa inaad aragto qoyskaaga ama asxaabtaada ama inaad shaqo hesho?
- Miyuu si lama filaan ah u xanaaqaa ama u camal xun yahay?
- Ma kuu diidaa inaad lahaato akoonno bangi, kaararka deynta, ama maareysato dhammaan lacagaha oo ma kugu qasbaa inuu kugula xisaabtamo wixii aad kharash gareyso?
- U isticmaalaa cabsi gelin ama xukumid adiga ama carruurtaada?
- Ku garaacaa, feeraa, dharbaaxaa, laadaa, taqaantaqiyaa, ceejiyaa ama ku qaniinaa?
- Kaa horjoogsanadaa inaad aado halka aad rabto, goorta aad rabto iyo cidda aad rabto?
- Kugu qasbaa galmo markaad aadan rabin ama sameeyaa waxyaabo galmo ah oo aadan dooneynin inaad sameysid?
- Ku bahdilaa ama ceebeeyaa dadka kale hortooda?

Haddii jawaabtaadu mid ka mid ah su'aalahan 'haa' tahay, waxaad u noqon kartaa dhibbane rabshada qoyska. Ma aha inaad khaldan tahay oo keligaa ma tihid. Waxaad mudan tahay in lagu caawiyo oo caawimaad ayaa la heli karaa.

2. **<u>Yaa u noqon kara dhibbane Rabshada Qoyska?</u>**

Labka iyo dheddiga labaduba waxay u noqon karaan dhibanayaal rabshada qoyska, in kastoo dembigani u saameeyo dumarka si aan kala sooc lahayn. Ereyga 'dhibbane' waxaa lagu qeexaa si ballaaran sharciga iyadoo loo adeegsanayo ereyga 'qoyska ama guriga qoyska' waxaana ku jira qof kasta oo hoos yimaada qaybta soo socota:

- lammaanaha isqaba ama kala tagay, lammaanaha isku jinsiga ah ama lammaanaha isqabin ee wadanool;
- dadka kula nool guri dembiilaha ama la noolaa dembiilaha muddo saddex sano gudahooda ah kahor dembiga;

- dadka guurkooda la kala diray ama lagu dhawaaqay inuu buray;
- fir ama farac ah;
- dadka kale waaweyn ee wadaaga hal qoys;
- dadka xiriirka aan rasmi ahayn leh, kuwaasoo is-shukaansnaya ama is-shukaansaday;
- dadka ah ama ahaa kuwa si rasmi ah ama aan rasmi ahayn ugu hawlan aragtida ah inay is-guursadaan ama galaan guurka dadka isku jinsiga ah;
- dadka dhiiga ama guurka wadaaga ilaa heerka saddexaad gabi ahaanba (tusaale. Awooweyaal/ayeeyayaal, adeerayaal/abtiyaal, eedayaal/habaryaryaal / ilma-adeerayaal/ilma-abti iwm);
- dadka ilmaha leh ama wada dhalay ilmo sida caadiga ah;

3. **<u>Tallaabooyin noocee ah ayaan qaadi karaa haddii aan u ahay dhibbane Rabshada Qoyska?</u>**

Sida caadiga ah, ka fikir **badqabkaaga marka hore**.
Marka ay <u>xaaladdu tahay degdeg ah</u>, taasi waa, xaaladdu markay khatar degdeg ah u keenayso noloshaada iyo hantidaada; waa inaad booliska ula xiriirtaa si degdeg ah si ay kuu caawiyaan adoo garaacaya 112. Lambarkan waxaa laga wici karaa telefoonada guryaha iyo telefoonka gacanta labaduba meelkasta oo ka tirsan Midowga Yurub (EU). Waxaa intaa dheer, telefoonka gacanta ma aha inuu wato lafta si aad u wacdo 112. Mar haddii wicitaanka kuu galo qofka kale, waa inaad isla markiiba sheegtaa cinwaanka gargaarka looga baahan yahay; lambarka telefoonkaaga si booliiska dib kuugu soo wacaan, haddii loo baahdo; iyo dhacdada rabshada qoyska.

Marka ay <u>xaaladdu aheyn degdeg</u>, dhawr ikhtiyaar ayaa la heli karaa:

a. Waxaad kiiska u gudbin kartaa booliska adigoo wacaya ama booqanaya, saldhiga booliiska ee deegaankaaga. Waxaad sidoo kale dirsan kartaa warbixin qoraal ah isla adiga ama

adoo caawimaad ka helaya qareen. Tani waa inay ku jiraan xogtaada shaqsiyeed (magacaaga, cinwaankaaga, iyo lambarka kaarkaaga aqoonsiga).

b. Waxaad wici kartaa Khadka Taageerada Xadgudubka Ilmaha iyo Dadka Waaweyn 179 ee 24-ka saac shaqeeya, oo lacag la'aanta ah.

c. Waxaad raadsan kartaa talobixinta xirfadle sharciyeed ama ururo bixiya taageero sharciyeed.

d. Waxaad caawimaad ka raadsan kartaa Adeegyada Bulshada adoo ka wacaya Agenzija Appogg 2295 9000.

Xiriiriyahani wuxuu ku siinayaa dhammaan adeegyada ay heli karaan kuwa ka badbaada rabshada qoyska https://meae.gov.mt/en/ZeroViolence/Documents/ZV_CollectionOfServices.pdf

Waa dantaada inaad tagto isbitaalka kuugu dhaw ama xarunta caafimaadka kadib rabshada qoyska si aad u diiwaangeliso dhaawacyadaada. Sawirro ka qaad dhaawacyadaada oo geli diiwaanka farriimaha, iimaylka ama xiriirada kale ee ka yimaada qofka kugu xadgudbay.

Nuqul ka samee dukumiintiyada, sida shahaadooyinka, qandaraasyada, baasaboorka iyo dukumiintiyada kale ee aad u maleyneyso inay muhiim yihiin.

4. **Miyaa la i dabagalaa?**

Dabagalka waa dembi aad u culus. Dabagalka wuxuu dhacaa marka
qofka kugu xadgudbay, ama qof kasta, oo si ula kac ah oo si ku celcelis ah u sameeyo waxyaabo kugu kalifaya inaad u baqdo amnigaaga, amniga xubin ka tirsan qoyska ama qof aad taqaano ama hantidaada.
Tusaalooyinka dabagalka waxaa ka mid ah:

- Markuu qofka kugu xadgudbay raadkaaga qaado jir ahaan ama qof u diro inuu sidaas sameeyo kaasoo kasoo muuqda

meelaha aad mar kasta joogto (tusaale. Guriga, dugsiga, shaqada iwm)

- si joogta ah kuu dhibo;
- baaro telefoonkaaga ama iimaylkaaga
- kugu abuuro cabsi
- si isdabajoog ah iskudayo inuu kuula soo xiriiro si kasta ay ahaataba (tusaale. Wicitaano, waraaqo, iimaylo, fariimo gaagaaban, ubaxyo aan loo baahneyn iwm.)
- daabaco macluumaad kugu saabsan adiga bilaa ogolaanshahaaga ama daabaco wada-xiriirka aad isweydaarsateen.

Waa inaad xafiddid dhammaan falalka dabagalka. Dabagalku aad ayuu halis u noqon karaa sidaa daraadeed waa inaad kala tashataa xirfadle wax ku saabsan tillaabooyinka gaarka ah ee aad qaadi karto si aad isku difaacdo.

5. **Haddii aan ka tago guriga guurka ma lumin doonaa wax xuquuq ah?**

Maya, xuquuqda aad u leedahay guriga guurka, xuquuqda aad u leedahay biilka ama wixii xuquuq ah oo ka dhasha guurkaaga looma dafiri karo xaqiiqda ah inaad ka uga tagtay guriga guurka rabshad qoyska awgeed. Si kastaba ha noqotee, waxaa lagugula talinayaa inaad booliska u sheegto sababta aad uga tagtay guriga guurka markaad raadsaneyso meel kale oo aad degi karto.

6. **Miyaan xadgudbaha u sheegaa booliiska?**

Waxaad u qalantaa nolol ka madaxbanaan gardarro iyo rabsho. Go'aanka ah in la soo sheego waa mid shaqsiyeed, hase yeeshe haddii booliisku ogaadaan in rabshada qoyska dhacday, wuxuu sharcigu ku qasbayaa inay baaraan oo ay tallaabo qaadaan maadaama dembiyada rabshada qoyska ay yihiin kuwa '*adag'*.

Waa inaadan isku eedeyn soo sheegida qofka kugu xadgudbay. Waa isaga qofka khaladka galay oo adigu ma ahan.

7. **Maxaan filan karaa kadib markaan warbixin u gudbiyo booliska?**

Mar haddii aad joogto saldhigga booliiska, booliisku waxay u qori doonaan warbixinta dhacdooyinka sida adigu aad u sheegto. Waxaa lagu talinayaa inaad weydiiso sarkaalka booliiska inuu akhriyo warbixinta kadib marka la qoro, si loo hubiyo in faahfaahinada muhiimka ah aan laga tagin. Waxaa intaa dheer, waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqulka warbixintaan. Adiga ayay dantaadu tahay inaad weydisato nuqul noocaas ah oo aad tusto qareenkaaga, haddii aad doorbideyso inaad mid qabsato.

Mar haddii warbixinta loo gudbiyo boolisku waxay isku dayi doonaan inay la xiriiraan dembiilaha.

Mararka qaarkood, marka booliisku u arko inay lagama maarmaan tahay in laga hortago inuu dembiilaha adiga ama qof kale waxyeelo u geysto, waxay dooran karaan inay xiraan isaga/iyada. Xaaladaas oo kale waa in eedaysanaha la hor keenaa maxkamadda 48 saacadood gudahood.

Waxaad xaq u leedahay in laguugu siiyo, luqad aad fahmayso, macluumaad ku saabsan marxaladda baaritaanka iyo marxaladda dacwada fal-dambiyeedka.
Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in lagu siiyo warbixin haddii booliisku xireen ama siidaayeen qofka kugu xadgudbay sida kiisku yahay, dembiyada lagu qaaday iyo go'aanka maxkamadda.
Booliisku sidoo kale waxaa waajib ku ah inay kugu wargeliyaan talaabooyinka la qaaday si loo hubiyo

badbaadadaada haddii xadgudbuhu ka baxsado gacanta booliska ama la siidaayo.

8. **Ma ka noqon karaa warbixinta aan u gudbiyey booliska?**
Maya, mar haddii ay booliisku ogaadaan in dembi rabshada qoyska la galay, waxaa ku waajib ah in loo sii wado si *adag*. Taas macnaheedu waa in booliiska fulinta ay awood u leeyihiin inay baaraan shilka iyadoo aan loo baahnayn oggolaanshaha ama fasaxa dhibbanaha. Sidaas awgeed, markii aad u soo sheegto dhacdada noocaas ah booliiska fulinta, laguguma qasbi karo inaad ka noqoto warbixinta noocan ah ama lagaama codsan karo in cabashadaada ka cafiso adigoo saxiixaya ama bixinaya ka cafin afka ah.

9. **Warbixintayda kadib, booliisku ma i siin karaa talaabooyin is-ilaalin?**

Mar haddii warbixintaada la gudbiyo, booliiska oo ay weheliyaan xirfadlayaal, ayaa ku qasban inay si dhakhso leh u sameeyaan baaritaan ku saabsan halista aad ku jirtid.

Haddii natiijada qiimayntu tahay inaad halis weyn ku sugan tahay, booliisku waa inay si dhakhso leh u codsadaan Garsooraha dacwada inuu soo saaro amar ilaalin kumeelgaar ah. Ilaalintaan ku meel gaarka ah waxaa la soo saari doonaa markuu Garsooruhu ku qanco inay jiraan sababo ku filan oo la cuskan karo.

Amarka ilaalinta kumeelgaarka ah ayaa shaqeynaya ilaa qofka kugu xadgudbay laga geeynayo maxkamadda oo waa la dheereyn karaa haddii kiisku sidaas u baahdo. Codsigan waxaa sameyn kara booliska ama adiga.

MAXKAMADDA DEMBIYADA IYO MAXKAMADDA MADANIGA

Waxa jira laba nooc oo maxkamado ah kuwaasoo la heli karo si ay u bixiyaan ilaalin - maxkamadda fal-dambiyeedka iyo maxkamadda madaniga. Maxakamadda qoyska waa maxkamad madani ah taasoo ay tahay inay ku difaacdo adiga iyo qoyskaaga.

1. **Ma la i siin karaa amar ilaalin?**

Haddii aad xaas tahay, ku jirto guur isku jinsi ah, wadanoolaasho ama aad ilmo aad isku dhasheen qofka kugu xadgudbay waxaad ka dalban kartaa Maxkamadda Qoyska amar ilaalin. Tani waxaa la sameeyaa iyadoo la adeegsanayo codsi maxkamadeed oo loo gudbiyo maxkamadda iyadoo loo marayo qareenkaaga. Kiiska waxaa loo qaban doonaa dhagaysi dacwadeed 4 maalmood gudahood.

Waxaad sidoo kale maxkamadda dembiyada ka codsan kartaa amar ilaalin iyadoo la adeegsanayo codsi maxkamadeed, mar haddii qofka kugu xadgudbay la xukumo ama dacwad lagu oogo (tus. la xiro ama la hor keeno maxkamad 48 saacadood gudahood ama eedeymaha la soo saaro laakiin wax xarig ah aan la sameyn).
Mar haddii codsiga la sameeyo, maxkamadda waxay magacaabi doontaa dhageysi dacwadeed muddo 7 maalmood gudahood.

Maxkamadda qoyska ama maxkamadda dambiyada labaduba, garsooraha ama qaadiga dacwadda midka uu ahaadato wuxuu tixgelin doonaa: -

- In lagaa ilaaliyo dhaawac ama faraxumayn;
- Daryeelka carruurtaada ama qof kasta oo kugu tiirsan oo ay soo gaari karto saameyn;
- Hoygaaga iyo sidoo kale kan carruurtaada iyo dadka kale kugu tiirsan;
- Dhibaatada uu sababi doono eedaysanaha

- Rabitaanka eedeysanaha inuu oggolaado daaweyn taasoo maxkamaddu u aragto mid ku habboon.

  Maxkamaddu waxay had iyo jeer soo saari doontaa amar ilaalin haddii adiga iyo dadka kugu tiirsan, sida kiiska yahay, aad halis weyn ku sugan tihiin.

2. **<u>Muxuu ka kooban yahay amarkailaalinta oo ilaa iyo intee ayuu shaqeynayaa?</u>**
   Amarka ilaalinta wuxuu xayiraa ama ka horjoogsadaa qofka kugu xadgudbay inuu ku soo wajaho ama kula soo xiriiro, kadib socsocodkaaga, imaanshaha gurigaaga, goobta shaqada, dugsiga ama meelaha kale ee aad u badan tahay xitaa haddii qofka kugu xadgudbay sheegto inuu xaq u leeyahay dhismayaashaas.

   Maxkamaddu waxay amri kartaa in amarka ilaalinta uu shaqeeyo ilaa 5 sano. Si kastaba ha noqotee muddadan waa la kordhin karaa haddii kiisku sidaas u baahan yahay. Waxaa lagugula talinayaa inaad la tashato shaqaalahaaga bulshada, wakiilkaaga sharci iyo/ama hay'ad bixisa adeegyadan oo kale haddii ay sii socoto in lagu faraxumeeyo.

3. **<u>Maxaa dhacaya hadduu xadgudbuhu jebiyo amarka ilaalinta?</u>**
   Mar haddii la soo saaro amar ilaalin, tani waxaa lala wadaagi doonaa Taliyaha Booliska. Taliyaha ayaa markaa waajib ka saaran yahay inuu la socdo shuruudaha ay maxkamaddu ku soo rogtay amarka ilaalinta.

   Si kastaba ha noqotee waxaa weli lagu talinayaa inaad wadato amarka ilaalinta marwalba, hadiiba ay dhacdo inuu qofka kugu xadgudbay isku dayo inuu kuula soo xiriiro si walba.

   Sharcigu ma dhigayo habraacyada ay tahay booliisku inay raacaan marka la jebiyo amar ilaalin, si kastaba ha ahaatee

boolisku waxaa waajib ku ah inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagu hubinayo badqabkaaga.

AADITAANKA MAXKAMADDA DEMBIYADA

Marka loo eego sharciga dembiyada, qofka kugu xadgudbay waxaa u ciqaabi karta maxkamada dembiyada dhaawaca, hanjabaada, dhibaateynta, dabasocodka, cabsi gelinta uu kuu geystay isagoo ku hanjabaya inuu waxyeelo kuu geysanayo adiga ama dadka kale ee kugu xeeran ama hantidaada, faraxumeynta galmo iyo dembiyada kale ee la xiriira. Maxkamaddu waxay amri kartaa in xabsi la dhigo, la ganaaxo ama labadaba. Marka laga reebo bixinta amarka ilaalinta, maxkamadda waxay sidoo kale soo saari kartaa amar daweyn, haddii ay u aragto inay tani faa'iido u leedahay badqabkaaga iyo inaad ka fogaato soo noqnoqoshada rabshada.

Adigoo ah qofka gudbinaya cabashada, doorkaaga ugu weyn ee kiisaska dembiyada waa inaad timaadid maxkamadda si aad u markhaati furatid oo aad maxkamadda ugu sheegtid sida xadgudbuhu kuu waxyeeleeyay. Shaqadaadu waa inaad runta ka sheegto waxa dhacay.

Waa muhiim inaad maxkamada timaadid maalinta loo qorsheeyay, sababta oo ah haddii aadan iman kiiska waa la baa'bi'in karaa cadeymo la'aan awgeed. Haddii aadan imaan karin maxkamadda sabab macquul ah awgeed, waxaa ugu fiican inaad u sheegtid wakiilkaaga sharci ama maxkamadda si toos ah.

Waxaad gacan ka geysan kartaa diyaarinta kiis adag adoo bixinaya dhammaan caddeymaha weerarka ama waxyeellada kuwaasoo ku soo gaarsiiyay xadgudbaha, soo bandhig sawirada dhaawacyada, shahaadooyinka caafimaadka oo keen marqaatiyaal kale oo laga yaabo inay ku habbon yihiin.

Dacwada maxkamadeed waxay noqon kartaa mid dheer, sidaa darteed filo inaad ka soo muuqato wax ka badan hal jeer ama sugto sida kiiska yahay, si kastaba ha noqotee sharcigu wuxuu kaa ilaaliyaa in dib laguu dhibaateeyo.

1. **Maxey yihiin xuquuqahayga inta ay socoto dacwada maxkamadeed?**

Rabshada qoyska ayaa maalmahan ah dambi loo oogo si adag sidaas darteedna dib dambe looguma baahna cabashada qofka la waxyeelleyay. In kastoo aadan qayb ka ahayn dacwada, sharciga wuxuu ku siinayaa xuquuq gaar ah sida *ka qaybqaate rayid ah:*

- Xuquuqda talada sharciga. Haddii aad ilmo yar tahay, waxaad xaq u leedahay qareen ilmeed.

- Xaq u lahaanshaha inaad la hawlgasho qareen ama sharci-yaqaan kaa caawiyo, helida caddeyn iyo qiimeynta ama su'aal weydiinta marqaatiyada isagoo ku matalaya.

- Xaq u lahaanshaha inaad ku hesho macluumaad luuqad fudud oo aad fahmi karto.

- Xaq u lahaanshaha in aad hesho macluumaad ku saabsan xuquuqdaada oo ay ku jirto sida loo helo taageerada, habka loo maro cabashooyinka iyo sida loo helo ilaalin

- Xaq u lahaanshaha inaad ka qeybqaadato dacwada

- Xuq ulahaanshaha inaad ka doodo maxkamadda haddii xadgudbaha damiin lagu siidaayo iyo haddii kalaba.

-Xaq u lahaanshaha in lagu siiyo taageerada aad u baahan tahay, oo ay ka mid tahay taageerada maskaxeed.

- Xaq u lahaanshaha turjubaan iyo in lagu siiyo turjumaadda macluumaadka haddii aadan fahmin luqadda lagu qabanayo dhageysiga dacwadaha;

Inkastoo aadan xaq u lahayn inaad racfaan ka qaadato xukunka maxkamadda darajada koowaad, waxaad xaq u

leedahay qofka la waxyeelleeyay ahaan, inaad dalbato diiwaanka dacwadaha oo uu weheliyo nuqul ka mid ah xukunka in loo gudbinayo Xeer Ilaaliyaha Guud (AG) oo aad ka codsato inuu gudbiyo racfaan.

- Marka rafcaanka la gudbiyo, waxaad xaq u leedahay in lagu ogeysiiyo taarikhda dhageysiga koowaad ama in laguu oggolaado dacwadaha. Marxaladan, waxaad sidoo kale la hawlgeli kartaa garyaqaan kaa caawiya, sameynta soo gudbin codsiyo iyo baarista ama su'aal weydiinta markhaatiyada isagoo ku matalaya. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa maxkamadda inay kuu oggolaato inaad sameyso soo gudbin codsiyo oo ku saabsan xukunka ku habboon in la marsiiyo eedeysanaha.

- Haddii kiiskaagu lagu qaadi doono maxkamada dembiyada, waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbiso xukunka ku haboon in la marsiiyo eedeysanaha.

2. **<u>Maxaan sameyn karaa si aan uga caddeeyo kiiskayga maxkamadda?</u>**

Waa muhiim in la helo oo la ilaaliyo wixii caddeyn ah ee rabshada qoyska, si la isugu dayo in laga fogaado dhacdadii hore ee 'wuxuu yiri, waxay tiri'. Kuwa soo socdaa waa noocyo caddeymo kala duwan ah oo kaa caawin doona inaad ka caddeyso kiiskaaga maxkamadda:

- ❏ Fariimaha gaagaaban ee hanjabaada ah;
- ❏ Qoraallada ama fariimaha Facebook ee hanjabaada ama handadaada ah;
- ❏ Wixii qoraal ama fariimo ah ee ka yimaada xadgudbaha;
- ❏ Wicitaanada duuban ee hanjabaada ama handadaada ah ee ka yimid xadgudbaha;
- ❏ Sawirrada nabarrada ama burburka hantiyeed;

- ❏ Shahaadooyinka caafimaadka la soo saaray kadib dhacdooyinka;
- ❏ Warbixinnada maskaxeed ama dhimireed marka xadgudubku loo geysan jirka;
- ❏ Warbixinnada booliiska; iyo
- ❏ Bayaanka Markhaatiga haddii marqaati goobjoog ahaa markii ay rabshada qoyska dhacaysay.

3. **Ma inaan isaga ku marqaati kacaa?**

Maragfurkaaga guud ahaan waa u muhiim kiisaska rabshada qoyska, maxaa yeelay caadiyan waa adiga kaliya inaad qofka runtii og waxa dhacay.

Haddii laguugu yeero inaad marag furto, waxaad codsan kartaa inaad marag furto adoo adeegsanaya muuqaal shireed (tus. aadan rabin inaad ku marag furto isla qolka xadgudbaha), si kastaba ha noqotee go'aankani wuxuu ku jiraa gacanta maxkamadda. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa maxkamadda in kiiska lagu dhageysto albaab xiran oo aan la oggolaan daabacidda magacyada.

4. **Ma looga baahan yahay carruurteyda inay marag furaan?**

Waxaa jiri kara marar carruurta laga codsan karo inay marag furaan, tusaale ahaan marka ay goobjoog ahaayeen markuu weerarku dhacayay ama dhibanneyaal toos ah yihiin laftooda.

Si kastaba ha noqotee, sida sharcigu qabo, baahida loo qabo ilmaha markhaatiga ah waa in la tixgeliyaa maxkamaduna waxay hubin doontaa in dantooda ugu wanaagsan laga taliyo.

Haddii ilmuhu, inkastoo isagu/iyadu noqon karto qof weyn, uusan dooneynin inuu marqaati furo, laguma khasbi karo inuu sidaa sameeyo maadaama sharcigu siinayo ikhtiyaar ah inuusan ku marag furin xadgudbaha qaraabadiisa ah.

AADITAANKA MAXKAMADDA QOYSKA

Haddii aad guursatay, ku jirto guurka dadka isku jinsiga, ku jirto wadanoolaasho ama aad ilmo wada dhasheen xadgudbaha, waxaad dooran kartaa inaad tallaabo kaga qaadatid maxkamadda Qoyska si aad sharci ahaan u joojiso xiriirka aad la leedahay xadgudbaha iyo/ama aad nidaamiso arrimaha la xiriira ilmaha/carruurta. aad wada dasheen xadgudbaha.

1. **Miyay tahay inaan soo maro dacwad dhexdhexaadin haddii aan ka badbaaday rabshada qoyska?**

Dhinac kasta oo raba inuu dacwad u gudbiyo maxkamadda qoyska waa inuu gudbiyaa dhexdhexaadin. Dacwada dhexdhexaadinta ah waxay noqon kartaa mid ku cabsi gelin karta xitaa haddii lagaa caawiyo oo sharciyan ku matalo. Si kastaba ha noqotee, tani waxay sidoo kale noqon kartaa ikhtiyaar aad doorbideyso inaad marto.

Haddii dhexdhexaadiyuhu ogaado ama hayo sabab looga shakiyo inay jirto rabshad qoyska, waxaa waajib ku ah inay si dhakhso leh maxkamadda u ogeysiiyaan. Waxaad sidoo kale soo bandhigi kartaa caddeyn markaad codsaneyso dacwada dhexdhexaadinta ah. Garsooraha ayaa markaa kadib amar ku bixin kara in dacwada dhexdhexaadinta ay xiran tahay wuxuuna kuu oggolaan inaad u sii gudubto dacwad maxkamadeed.

2. **Ma ka codsan karaa maxkamadda inay ku amarto xadgudbaha inuu ka tago guriga aan wadaagno?**

Haa. Tani waxaa la codsan karaa marka lagu jiro marxalad kasta oo dacwada ah. Maxkamaddu waxay qiimeyn doontaa dacwada loo soo gudbiyey, waxayna caddeyn kadib bixin kartaa amarka ah in xadgudbaha laga saaro guriga inkastoo hantida ay noqon karto tiisa.

3. **Maxkamaddu ma igu wareejin kartaa daryeelka buuxa iyo haynta carruurtayda?**

Maxkamaddu mar kasta waxay tixgelin doontaa waxa u danta ah carruurtaada, xitaa intaa waxaa dheer, marka ay jirto caddeyn rabshada qoyska ah.

Maxkamaddu marka sababo culus hesho, ka reebi kartaa haynta waalidka xadgudubka geysta. Sharciga wuxuu had iyo jeer u arkaa in rabshada qoyska inay tahay sabab culus.

4. **Ma codsan karaa masruufka aniga iyo carruurteydaba?**

Haa. Waxaad gudbin kartaa codsiga marxalad kasta oo dacwada, xitaa haddii aad wali ku jirto marxaladda dhexdhexaadinta.

5. **Miyuu waalidka xadgudubka gaysta ee carruurtayda arki karaa iyaga?**

Marka ay jirto caddeyn rabshada qoyska ah, maxkamaddu way xaddidi kartaa ama diidi kartaa arkida carruurta. Tani waxay ka daran tahay, haddii ay artidu adiga iyo carruurtaada halis gelinayso.

Haddii arkida loo adeegsado in si dheeraad ah loo xakameeyo adiga ama carruurtaada, sida in laguu diido inaad aragto, maxkamadda waxay la noqon kartaa xaqa arkida.

Maxkamaddu waxay sidoo kale amri kartaa in arkida carruurtu kormeero maamul awood u leh sida Agenzija Appogg ama kormeere maxkamad magacawday.

MAGDHAWGA DADKA LOO GEYSTAY RABSHADA QOYSKA

Magdhaw in la bixiyo ayay ku dhawaaqi kartaa maxkamadda dembiyada ama maxkamadda madaniga. Marka ay go'aanka gaareyso, maxkamadda dembiyada waxay ku amri kartaa qofka xadgudubka gaystay inuu bixiyo magdhawga waxyeellada jireed, sumcad dillida iyo/ama waxyeellada maskaxeed.

Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad ka dacweyso qofka kugu xadgudbay gudaha maxkamadda madaniga ah wixii sumcad dillid ah iyo/ama waxyeello maskaxeed ah. Tani waxaa la sameeyaa iyadoo loo gudbinayo codsi maxkamadda Madaniga (ma aha maxkamadda Qoyska).

Marka rabshada qoyska ka kooban yihiin kiisas kufsi, waxyeello daran oo jireed, kala-waaridida dadka ama dabagalka, qofka wuxuu codsan karaa nidaamka magdhawga dembiyada muddo hal sano gudaheeda ah laga bilaabo fal-dambiyeedka. Tani waxay qusaysaa muwaadiniinta Malta ama Midowga Yurub (EU) iyo degganeyaasha Malta. Haddii codsiga la aqbalo, gobolka ayaa bixin kara magdhaw gaaraya €23,300, kaasoo gobolku dib uga sheegan doono wixii magdhow ah ee aad ka hesho dembiilaha.

Small Initiatives Support Scheme

This project has been funded by the Small Initiatives Support Scheme (SIS), managed by the Malta Council for the Voluntary Sector (MCVS). This project reflects the views only of the author, and the MCVS cannot be held responsible for the content or any use which may be made of the information contained therein."

Malta Council for the VOLUNTARY SECTOR